BAYAANKII ISTANBUUL
ISTANBUUL, TURKEY, 22 MAY 2010

Shirweynaha Istanbuul ee looga hadlaayey Soomaaliya waxaa uu ka dhacay magaalada Istanbuul intii u dhaxeysay 21-23 May 2010 wuxuuna muujiyey taageeradda adag ee ay Qaramada Midoway. Dawlada Turkiya iyo Bulshadda Caalamka u hayaan la shaqeynta Hay'adaha Kumeel gaarka ah ee Federaaliga ah iyo dadka Soomaaliyeed si loo dhameeyo loogana guuleysto iska dabawareega ku dhisan sharci daradda, Qaska iyo rajo la'aanta ka jirta dalka, dhibkana lagu bedelo Nabad iyo aayaha dadka Soomaaliyeed oo barwaaqooba. Shirka wuxuu xaqiijiyey madaxbanaanida wadanka, lama taabtaanimada dhulkiisa iyo midnimadda Umadda Soomaaliyeed.

Arrimaha shirka looga hadlay waxaa ay waafqsanaayeen heshiiskii Jabuuti, heshiiskaasoo dadka Soomaaliyeed iyo Madaxdooduba si cad oo macquul ugu tilmaamayey habka lagu helaayo nabad loo wada dhan yahay ee waarta Soomaaliya. HESHIISKII JABUUTI weli wuxuu u furan yahay dhamaan dadka soomaaliyeed ee doonaaya inay Nabad iyo dib u heshiisiin iyo Horumarba ka dhacdo dalkooda. Shirku wuxuu taageero buuxda siiyey dadaalka ay wadaan Madaxweyne Shjariif Sheekh Axmed iyo hay'addaha Federaalka KMG Soomaaliya oo ay doonayaan inay ku hirgeliyaan heshiiskii Jabuuti, shirku wuxuu mar labaad ku nuuxnuuxsaday sida ay ugu go'an tahay hurumarinta nolosha iyo Amniga dadka Soomaaliyeed, horumarinta arrimaha dib u heshiisiinta, Xuquuqul Insaanka, Maamul Wanaaga iyo sidii dadku u heli lahaayeen adeegyada aasaasiga ah una bilaabi lahaayeen dib u dhiska. Soomaaliyana loogu ridi lahaa habkii nabad iyo dib u dhis waara ay ku heli lahayd.

Shirka wuxuu isla garwaaqsaday inay jiraan dhowr balanqaadyo horey loo galay laguna suubiyey shirar mar hore la qabtay ee aan welila fulinin balanqaadyadaas oo ku saabsanaa Soomaaliya, sidaas darteed, shirku wuxuu ku guubaabiyey hay'adaha Federaaliga ah iyo Bulshada Caalamkuba inay fuliyaan Balanqaadyadaas, shirku wuxuu muhimad gaar ah siiyey baahida degdega ah ee loo qabo in dawlada Federaalka si deg deg ah wax ugu qabato caqabadaha siyaasad, dhaqaale iyo amni ee jira. Shirku wuxuu ku guubaabiyey Private Sectorka in ay ku ciyaaraan door wax dhis leh ee lagu xoojinaayo nabada iyo xasiloonida.

1. Shirku wuxuu garwaaqsaday:

- In dadka Soomaaliyeed iyo Madaxdooduba waxaa manta heysta dhibaato ka imaanaysa dalka gudihiisa iyo faragelin dibadeedba, taasoo la doonaayo in wax loogu dhimo arrimaha Bulshada, Dhaqaalaha iyo Horumarka siyaasadeedba ee dalka, si looga hartago dhibaatada hadda jirta iyo amni la'aanta waxay u baahan yihiin Go'aan adag iyo dadaal dheer oo lagu horumarinaayo iskaashiga Siyaasadeed laguna dhisaayo hay'ado adag oo dowli ah, iyadoo isla markaana wax laga qabanaayo waxyeelada iyo faragelinta ay wadaan kuwa sida xoogga leh ugu faa'ideysanaaya dhibaatada jirta iyo joogitaanka dagaalyahanadda Ajaanibta ay dalka joogaan iyo shaqsiyaadka kale ee xagjirka ah.

- Waxaa kale oo muhiim ah in ay sidoodii u sii socdaan geedi socodka nabadda Jabuuti iyo arrimaha kale ee quseeya. Heshiiskii Jabuuti oo si dhab ah loo

hergeliyaahi wuxuu u baahan yahay in la diido oo laga horjimaado falalka ku dhisan nabadgelyo la'aanta iyo xagjirnimadda. Waxaa kale oo hehsiisku dalbanaysaa in si joogta ah loola xiriiro kuwa wax tabanaaya iyo dib u heshiisiin siyaasadeed oo lala galo kuwa aan ka midka ahayn geedi socodka nabadda ogolna wadahadalka. Shirku wuxuu soo dhaweeyey horumarka ay samaysay dawlada Federaalka KMG ah taasoo ku cad heshiiskii ay la gashay AHLU SUNNAH WAL JAMEECA bishii April 2010 iyo heshiiska iskaashi ee dhex maray Dawlada iyo Ahlu sunnah bishii August 2008. shirku wuxuu ku guubaabiyey PUNTLAND ay sii wado oo ay joogteyso xasiloonida meesheeda ka jirta iyo iskaashiga siyaasadeed ee ay la samaynayso dawlada KMG ah. Shirku wuxuu soo dhaweeyey geedisocodka ku fadhida dimoqradiyada ee ka socota SOMALILAND wuxuuna ku guubaabiyey reer Somaliland in si nabad ah ku dhameeyaan doorashooyinkaasi ayna u dhacaan si hufan.

- Soomaaliya waxay u baahan tahay inay dhisato ciidamo tayo leh daacadna ah ciidamadaas oo leh talis mideysan oo adag, kuwaasoo ay ka midka yihiin ciidamada Qalabka sida ee hadda Dawlada KMG ah ku soo biiray. Dib u soo nooleynta, tababarida, Qalabeynta, Mushaarsiinta iyo haynta ciidamada Amniga Soomaaliyeed ayaa intuiba muhiim u ah ku soo celinta xasilooni waarta Soomaaliya, shirka waxaa uu amaanay dhamaan wadamada iyo ururada caalamiga ah ee xoogga saaray tababarida ciidamda Soomaaliyeed. Shirku wuxuu ku nuuxnuuxsaday muhimada ay leedahay in la helo hab isla xiriira oo waqtiyeysan oo looga helaayo taageero joogta ah bulshada caalamka, sidaasi darteed shirku wuxuu ugu baaqay in si dhaqso leh oo an dib u dhigasho lahayn loo bixiyo balanqaadyadii maaliyadeed ee horey loo balanqaaday ee lagu taageeraayey hay'adaha Amniga Soomaaliyeed. Intaas waxaa dheer shirku wuxuu soo dhaweeyey tirade isa soo tareysa ee ciidamo oo loo tababaraayo Soomaaliya, sidoo kale magacaabista loo magacaabay saraakiisha saresare ee ciidamada Dawlada KMG ah kuwaasoo ugu dambeynta horumarin doona habka is xukunka iyo dhismaha ciidamadda.

- Dib u dhiska iyo horumarinta Soomaaliya waxaa keliya ee lagu xaqiijin karaa marka la helo isla shaqeynta hay'addaha dawliga ah, Ganacsatada madaxa banan, bulshada rayidka ah, haweenka, Qurba joogta iyo bulshada Caalamka kuwaasoo dhamaantood iskula howlgalayaa si waxtar leh oo iskaabaysa, howlada dib loogu dhisaayo dalka waxay waxweyn ka tarayaan arrimaha bulshada, dhaqalaha iyo horumarinta dhaqanka ummadda Soomaaliyeed iyadoo la adeegsanaayo maalgelin horleh lana joogteynaayo fursad dhaqo lagu abuurayo iyo tababarba, shirku wuxuu dhiirigelinayaa in xoogga la saaro lix (6) arrimood oo muhiim ah oo ay isla garteen Dawlada Federalka KMG ah iyo Bulshada Rayidka waxaana ka mid ah arrimaha Isgaarsiinta, kaabayasha dhaqaalaha, dhoofinta Xoolaha nool, Kaluumeysiga, bangiga iyo Xawaaladaha iyo helitaanka habka kale oo shidaal ah. Shirku wuxuu si gaar ah ugu baaqay in la taageero dhaqaale u helida garoomada diyaaradaha ee Boosaaso iyo Garowe.

- Waxaa aad muhiim u ah in mar labaad xoogga la saaro sidii lagu soo nooleyn lahaa dhaqalaha Soomaaliya iyo Horumarinteedaba. Shirku wuxuu iska

waajibiyey in u la yimaado qorshe la taaban oo lagu maal gelinaayo mashaariic tijaabo ah oo ay isla maalgelinayaan dawlada iyo ganacsiga gaarka loo leeyahayba si loo abuuro gobo looga faa'ideysto dhaqaale ahaan.

- Shirku wuxuu soo dhaweeyey dooda ka dhexdhacday bulshada Ganacsatada ah, Qaramadda Midoway, Jaalayaasha kale ee qaabilsan horumarinta iyo dawlada Federalka "***doodaas oo ku saabsanayd abuuritaanka jawi iyo xaalad ay ganacsatada mas'uulka ah ay ku maalgeshan karaan Soomaaliya"*** shirka waxaa uu isla gartay baahida loo qabo in dalka laga abuuro shuruudo fududeyn kara ganacsiga, shuruudahaas oo u faa'ideynaya dhamaan dadka Soomaaliyeed, shirku wuxuu dalbanayaa in la meelmariyo arrimihii ganacsatada soomaaliyeed ay soo jeediyeen.

- Dawlada federalka KMG ah Soomaaliyeed oo kaashanaysa bulshada Caalamka ayaa waxaa saran mas'uuliyad weyn oo ay wax ugu qabanayso baahida beni'aadanimo ee dadka Soomaaliyeed ahaysata sidaasi darteed dawlada federalka KMG ah waa inay gudataa waajibaadka ay ku xaqiijinayso in si naabadgelyo ku dheehan tahay lagu gaari karo dadka dhibaataysan, waana in ay gudataa umaddana u qabataa adeegyada aasaasiga ah una maamusha dhaqaalaha dalka si hufan waana in ay xaqiijisaa in si cadaaladi ku dheehan tahay loo qeybiyo daqliga dalka, waa in ay dawlada la timaadaa talaabooyin wax looga qabanaayo masumaasuqa, waa in ay horumarisaa taageertaana ganacsiga gaarka ah waana in ay dhistaa awooda waxqabad ee hay'adaha dawlada u qaabilsan arrimaha maaliyada, bulshada caalamka waa in ay sii wadaa taageerada ay siineyso dadka Soomaaliyeed, shirka waxaa uu ogalaaday in ay arrimaha dib u dhiska ahee ka soo baxay shirka ISTAMBUL ay kaabi doono kaalmooyinmka beni'aadanimo ee hadda la bixinaayo, uuna waxba u dhimi doonin in mar kale la qabto shir caalami ah oo looga hadlayo dibu dhiska dalka.

2. Shirka:

- Wuxuu amaanay doorka ciidamada AMISOM ay ka qaateen Soomaaliya doorkaas oo ku aadan sidii nabad waarta iyo xasilooni loogu soo celin lahaa Soomaaliya, waxa kale oo uu shirka ka mahadceliyey sida joogtada leh ee ay u keenayaan ciidamo iyo qalaba loo siinaayo AMISOM oo ay u bixiyaan wadamadda Brundi, Uganda iyo Wadamadda AMISOM u qaabilsan inay keenaan tababaryaal Booliis ah sida Brundi, Chana, Nayjeeria, Syraliyon, Uganda iyo Zaambiya. Wuxuu cambaareyyey shirku caqabad kasta ama dagaal kasta oo lala galaayo AMISOM iyo hay'addaha Fedralka KMG ah ee Soomaaliyeed. Shirku wuxuu ugu baaqay ururka Midowga Afrika in uu bixyo ciidamo hor leh oo uu siiyo AMISOM si ciidamada AMISOM u gaaraan awoodii loo baahnaa ee sharciga u ogolaanaayey. Shirku wuxuu bogaadiyey taageerada dhaqaale ee bulshada caalamka ay siinayso AMISOM waxaa kale uu uu shirku hoosta ka xariiqay baahida loo qabo in kaalmo dhaqaale oo laysku halayn karo oo waqtiyeysan la siiyo ururka Midowga Africa oo ay siiyaan dhamaan saxiibada ay quseyso. Sidaasi darteed shirku wuxuu ku baaqay in si dhaqsi leh loo fuliyo wixii balanqaad dhaqaale ah ee lagu sameeyey shirweynihii dhaqaale ku yaboohida ahaa ee Brussels ee la qabtay 23 April 2009.

- Shirku wuxuu isla garwaaqsaday doorka muhiimka ah ee urur goboleedha IGAD uu ciyaaraayo iyo wadamada deriska la ah Soomaaliya, doorkaas oo lagu horumarinaayo xasilooni amniga iyo horumarinta soomaaliya iyo wadamada Gobolkaba. Shirku wuxuu dib u xaqiijiyey mabaa'dida ku qotoba deris wanaaga wuxuuna ugu baaqay jaalayaasha Soomaaliya saaxiibada la ah inay sii wadaan taageerida ku aadan arintaas. Shirku waxaa kale uu mar labaad soo dhaweeyey go'aankii ka soo baxay kulan madaxeedkii ururka Jaamacada carabta ee lagu qabtay Sirta, Libyia bishii Maarso 2010 kaasoo ku baaqaayey in la qabto *shir kor loogu qaadaayo howlaha dib u soo kabashada Soomaaliya* (wejiga hore) shirkaas oo dhici doona bilaha soo socda gudahooda. Shirku wuxuu ka mahadceliyey sida ay ugu go'an tahay Ururka Jaamacada Carabta inuu horumarin ku suubiyo dadaalkiisa ku aadan natiijada iyo dareenka natiijada ka soo baxday shirka Istanbul iyo in shirkaasi iskaashi buuxda lagula suubiyo Dawlada Federaaliga ah ee Soomaaliyeed, Jamhuriyada Turkiya, Ururka Midowga Afrika, Igad, Qaramadda Midowday iyo Ururka Islaamka Aduunka, waxaa kale uu uu shirka soo dhaweeyey talo soo jedintii Bangiga Islaamka Aduunka ee uu ku sameynaayo guddi afarta bilood ee socoto gudahooda taasoo la isugu keenaayo hay'addaha wax horumaya si looga jawaabo baahida degdeg ah ee ay Soomaaliya qabto taasoo ku aadan marka dalka xasilooni ku soo noqota, guddiga la samayn doono waxaa shir gudoomin doona wadanka Turkiya waxaana laga doonayaa inuu xaqiijiyo sidii baahida beni'aadamka ee umadda lagu gaarsiin lahaa iyadoo aan wax caqabad ah la gelinin isla markaa dib loogu dhisi lahaa kaabayaasha dhaqalaha dalka laguna horumarin lahaa nolosha dadka laguna abuuri lahaa shaqo. Shirku wuxuu soo dhoweeyay Xafiiska dhowaan ay OIC da ka furatay Muqdisho- arrintaas oo waafaqsan meelmarinta balanqaadyadii la sameeyay markii uu dhacayay Shirkii 16 naad ee ICG da ee lagu qabtay Jeddah bishii December 2009 kaas oo ku guubaabinaayay saaxiibadda Soomaaliya in ay dedejiyaan kaalmada ay siinayeen Soomaaliaya si ay wadanka ugu muujiyaan taageerada lataaban karo oo ay u hayaan.

- Shirku wuxuu dareen xoog leh ka muujiyey falka isa soo taraaba ee ku dhisan burcad badeednimada iyo dhaca hubeysan ee ka dhacaaya baddaha Soomaaliya laguna qaadaayo maraakiibta mareysa xeebaha soomaaliya. Shirku wuxuu mahadcelin ka bixiyey kaalmada ay Qaramadda Midoway, ururada kale ee caalamiga ah iyo wadamada deeqda bixiya ay siiyeen korna ugu qaadeen awooda hay'adaha garsoorka ah iyo ciidamada maxaabiista ee Soomaaliya ka jira iyo Kenyaba, Seychelles iyo wadamada kale ee gobolka ka jira, taasoo kor loogu qaadayey habka lagu maxkamadeynaayo dadka lagu soo eedeeyo falka burcad badeednimada ah xabsigana loogu diraayey kuwa la xukumo, habkaas oo waafaqsan shuruucda caalamka ee xuquuqul insaanka. kaalmadaas oo lala kaashanaayey guddiga la xiriirka Soomaaliyeed ee falka Burcad badeeda ee ka dhacaya dhulka xeebaha Soomaaliya ka baxsan (CGBCS) sidaasi darteed, shirku wuxuu soo dhaweeyey in la sameeyo sanduuq dhaqaale oo lagu taageeraayo kooxda la xiriirka calaamiga ah ee qaabilsan burcadeeda ka howl gasha xeebaha Soomaaliya si lagu bixiyo qarashka ku baxaaya Maxkamadeynta eedeysanayaasha burcad badeeda ah laguna taageero howlaha kale ee looga soo horjeedo burcad badeeda, laguna soo dhaweeyo wadamada xubnaha ka ah iyo kuwa kale ee deeq bixiyeyaasha

ah si ay u bixiyaan qarashkaas. Shirku waxaa kale oo uu amaanay dadaalada kale ee ay samaynayaan wadamada kale ee ay ku maxkamadeynayaan dadka lagu eedeeyey burcad badeednimada kuwaasoo lagu maxkamadeynaayo wadamada burcada qabatay, wuxuu kale uu ugu baaqay wadamada kale in ay fududeeyaan habkii lagu maxkamadeyn lahaa eedeysanaaysha kale maxkamadahooda taasoo la waafajinaayo shuruucda caalamiga ah xuquuqul insaanka, shirku waxaa kale oo uu soo dhaweeyey kana mahadceliyey doorka ay ciyaarayaan ciidamada wadamamada reer Yurub ee la yiraahdo ATALANTA, kuwa NATO, kuwa loogu talagalay badbaadada badaha iyo biyo mareenada ee 151 ee jooga dhulka xeebaha Soomaaliya ka baxsan.

3. Dawlada Federalka KMG ah ee Soomaaliya waxay xaqiijisay:

- In ay tahay mas'uuliyadeeda koowaad in ay siiso amni dadka Soomaaliyeed iyadoo kordhinaysa tababarka ciidamadeeda iyo inay isku dhafayso dhamaan ciidamada oo dhan oo ay ku jiraan kuwa Ahlu Sunnah Wal Jameeca isla markaana ay horumarineyso habkii iyo shaxdii lagu kontarooli lahaa dhismaha ciidamada Soomaaliyeed.

- Waxay balanqaaday inay sii wadi doonto la xiriirista dadka, sii wadista wadahadalka iyo dadaalada dib u heshiisiinta ku dhisan, iyo inay si dhab ah oo la taaban karo u hergeliso iskaashina ula samayso Ahlu Sunnah Waljamaaca, una fidin doonto jaalnimo iyo saaxibtinimo wadamada gobolka iyo maamulada maxaliga ah ee jiraba.

- In ay iska dhowri doonto in dawlada dhexdeeda muran ka dhexdhaco si ay markaas wax ugu dhimin howlaha hay'adaha federaaliga ah ee KMG ah isla markaana u adeegi doonto dadweynaha. Arimahan waxaa ka mid noqon doono inay u howlgeli doonto sidii loo xoojin lahaa hab dhismeedka ismaamulka ee dawlada, kuna xaqiijin lahayd hab hufan oo ku dhsian isla xisaabtan iyo inay si la tayo leh u howlgalaan hay'adaha Federaaliga ah. Inay raadin doonto hindisayaal cusub oo ay kula xiriiri doonto dadweynaha Soomaaliyeed looguna qori lahaa dastuur ku dhsian nidaamka federaali ah.

- Dawlada federaalka KMG ah waxay xaqiijisay in hab loo wada dhan yahay kuna dhisan isla tashi lala imaan doono lana horumarin doono rubaca sadexaad ee dhamaadka 2010, waxaa kale oo muhiim ah in ay dawlada Federalka KMG ah Soomaaliyeed la wareegto mas'uuliyada habka hirgelinta howlaha loobahan yahay in la hirgeliyo xilliga kala guurka.

Shirka ISTANBUUL waxaa uu xaqiijiyey sida dunida ugu go'an tahay in Soomaaliya la kaalmeeyo loona diido in dalka loo abuuro xasilooni daro iyo dhibaato kale. Waxaan fariin cad u direynaa dadka Soomaaliyeed inaynan ku keli ahayn raadinta habkii loogu heli lahaa nabad, dib u heshiisiin iyo barwaaqo kadib markii ay intaas oo sanno oo dhibaato iyo macaluul ay soo mareen, iyadoo la kaashanaayo dadaalka Hay'adaha Federalka KMG ah ee Soomaaliyeed, Bulshada Rayidka ah iyo Ganacsatada Madaxa banana iyo bulshada caalamka waxaa suurtagal ah in la helo mustaqbal ifaaya oo Soomaaliyeed.

Shirku wuxuu garwaaqsaday in shirka kale ee guddiga heerka sare ee la xiriirka uu ka dhici doono Madrid, Spain bisha September 2010.

Shirku wuxuu aad ugu mahadceliyey qabashada dawlada iyo dadka reer Turkiya ay qabteen shirka Istanbul shirkaas oo qeyb weyn ka ah habka loogu helaayo nabadda iyo xasiloonida wadanka Soomaaliya.